

Lesson 9

Ballaanqadka Cajibka ah

Nabad korkiina ha aahato saxiibada ina dhageysan hayaan. Waxaan idinku salaamaya magaca Eebbe nariix guud iyo midba garaab naxariistaa. Waxaynu ku faraxsan nahay in aan idin soo bandhigno barnaamijkeena jidka xaqnimada.

Barnaamijka aan soo daafnay waxay araagna siduu Adan iyo Xawa ay raaci wayeen Rabbiga ayna cuneen geedkii Ilaahay ka xareentayay. Ninkii u ilaahay abburay wuxuu raacay shadanka hadalkiis, Shaydanku waa cadowga ilaah. Inta aysan dambabin Adan iyo Xawa, aad bay ugu faraaxsanayeen ilaahay marku beerta janaada yimado una la hadlo iyaga, Markay cuneen geedkii, cabsi iyo ceeb ayay dareemen. Waxayna isku dayeen in ay ilaahay iska qaariyaan. Iqaabtuna waxay noqotay dhimasho.

Dambigii Adam iyo Xawa sameeyen waxay ka foogeysay Rabbiga:

Rooma 5:12 - Haddaba sida dembigu nin keliya dunida ugu soo galay, dhimashaduna dembiga ugu timid, sidaasaa dhimashadiina u gaadhay dadka oo dhan, waayo, waa la wada dembaabay;

Rooma 3:23- Maxaa yeelay, dhammaan way wada dembaabeen oo gaadhi waayeen ammaanta Ilaah.

Ishacyaah 59:2 - laakiinse xumaatooyinkiinnaa idin kala soocay idinka iyo Ilaahiinna, oo dembiyadiinnaa wejigiisa idinka qariyey, oo saasuusan idiin maqlin Maahmaahda wolof: runta waay kulushahay.

Sdiaas dareed waxaynu araagnay in dambigii Adan sameyay awgiis ay bani-adamka oo dhan u uga foogadeen Rabbiga. Billowgii Adan erayga rabbiga ayu diiday (bani-aadamka oo dhan ma dhalanin waqtigasi)

Rooma 5:20 Sharciguna wuxuu u yimid inuu dembigu bato, laakiinse meeshii dembigu ku batay, nimcaduna way ka sii badatay aad iyo aad.

Luke 2:10 Markaasaa malaa'igtii ku tidhi, Ha baqina, waayo, ogaada, waxaan idiin keenay war wanaagsan oo leh farxad weyn oo u ahaan dadka oo dhan.

Tiitos 2:11 - Waayo, nimcadii Ilaah way muuqatay, iyadoo badbaado u keenaysa dadka oo dhan.

Afar shay oo run ayuu ilaahay sheegay:

1. Ilaahay wuu sheegay in ciise u dhalan doono, ayna dhali doonto Maryam
2. Ilaahay wuxuu sheegay oo kale markay Adam iyo Xawa dambabeen in shaydanku edbintiisa ay ahaa doonto silic
3. Runta seddexada way ku saabsan tahay ilaahay wuxuu shaydanka oo ahaa abeesadii wuxuu buurburin doona madaxiisa

4. Ugu dambeytii ilaahay wuxuu sheegay in labo jiid oo dad ah ay jiri doonan dunida: Kuwa shaydanka raacsan iyo kuwa rabbiga adeecsan.

(Waa iga talo) Maahmaahyadii 3:21-24 Wiilkaygiiyow , waxyaalahanu yaanay indhahaaga ka tegin. Xigmadda iyo digtoonaanta xajiso. Sidaasay naftaada nolol ugu noqon doonaan, Qoortaadana nimco. Markaasaad jidkaaga ammaan ku mari doontaa, Oo cagtaaduna ma turunturoon doonto. Markaad jiifsatidna ma cabsan doontid; Haah, waad jiifsan doontaa, oo hurdadaaduna way kuu macaanaan doontaa.

Ilaahay wuxuu janada ka soo saaray Adan iyo Xawo. Ilaahay waa xaaq soore.

Umana dulqaato dambiga. Tan labad, naxariista rabbiga way badan tahay